2. Xeerka Dhaqan-Anshaxeedkaa ee Ururrada Laanqayrta iyo Bisha Cas ee Caalamiga ah iyo Ururrada aan Dowliga ahayn ee Ku Hawlan Gurmadka Masiibooyinka.

Waxa wadajir u dhigay anshaxan ururrada laanqayrta iyo bisha cas ee caalamiga ah.

Danta iyo ujeeddada

Xeer-dhaqan anshaxeedkan waxa uu ilaalinayaa damiirka iyo dabeecadaheena. Looguma talo galin oo keli ah hagidda socodsiinta hawlaha, sida qorshaynta qaybinta raashin ama yagleelid xero qaxooti. Waxaase looga dan leeyahay kobcinta isku filaanshaha, kartida iyo saameynta ay ku yeelanayaan hawlaha gurmadka ah ee ay wadaan ururrada aan dowliga ahayn iyo ururrada laanqayrta cas iyo bisha cas. Waa xeerar aan lagu dirqiyayn ururrada kale balse ay muhiim tahay in ay meel mariyaan ururrada qaata xeer-dhaqan anshaxeedkan.

Haddiiba uu meel ka dhaco iska hor-imaad hubaysani, xeer-dhaqan anshaxeedkan waxa la waafajinayaa sharciyada bani'aadanimo ee caalamiga ah.

Xeer-dhaqan-anshaxeedkan la soo bandhigay waxa la socda saddex lifaaq oo qeexaya sida loogaga baahan yahay in ay taageero ka gaystaan deeq-bixiyayaasha, ururrada caalamiga ah iyo dawladaha dalalkooda aan ka shaqaynaba habsami u socodka hawlaha gaarsiinta iyo qaybinta gargaarka.

Xasuus

1. Waxaa maal-geliyay Caritas Internationalis*, Catholic Relief Services*, Ururka Federaalka Laanqayrta Cas ee Caalamiga ah iyo Urrurada Bisha Cas*, Isutagga Urarrada Badbaadada Carruurta ee Caalamiga ah*, Luthern World Federation*, Oxfam*, Ururka Kaniisadaha Adduunka*, Guddiga Laanqayrta Cas ee Caalamiga ah (* xubin ka mid ah guddiga maamusha wax ka qabashada Hawlaha Samafalka Bini'aadamnimo).

Qeexido

NGOs: (Ururrada aan dowliga ahayn) waa ururrada, ha ahaadeen heer qaran ama caalamiye, loo aasaasay si gaar ah oo ka madax bannaan faragelinta dowladaha dalkooda lagu dhisay.

Ururada Gargaarka ee aan Dowliga Ahayn waa tiraab koobaysa dhammaan ururrada Laanqayrta Cas, Bisha Cas, xiriirka caalamiga ah ee ay ku bahoobeen labadan urrur, ururrada laanqayraha iyo bilaha cas ee maxalliga ah iyo ururrada aan dowliga ahayn ee kor ku qeexan kuwaas oo dhammaantoodba ku lug leh wax ka qabashada masiiboyinka.

IGOs: (Ururada Dawliga ah) waa ururrada ay ku bahoobeen laba dawladood ama in ka badan. Waxa ka mid ah ururradan dhammaan Hay'adaha Qaramada Midoobay iyo Urur goboleedyada.

Masiibooyin: waa mashaqo ku habsata dadka taas oo keenta dhimasho iyo khasaare mood iyo noolba ah, saamayna ku yeelata dadka ka badbaada.

Xeer Dhaqan Anshaxeed

Xeerka Ashaxa ee u yaalla Ururrada Caalamiga ah ee Laanqayrta iyo Bisha Cas iyo Ururrada aan dowliga ahayn ee ku hawlan barnaamijyada wax ka qabashada masiibooyinka

1. Mudnaanta Tilmaamaha bini'aadminimo

Xuquuqda helidda iyo bixinta gargaar ban'iaadamnimo waa mabda' asaasi ah oo ay tahay in ay ku sifoobaan dhammaan dadyowga dalalka dunidu. Maaddaama aynu xubin ka nahay beesha caalamka, waxa aynu garawsanahay waajibaadkayaga ah gaarsiinta gargaarka goob kasta oo looga baahan yahay. Sidaa awgeed ayaa uu galaangal buuxa oo aannu u helno goobaha ay baahidu ka jirtaa lagama maarmaan ugu yahay gudashada waajibaadkayaga. Ujeeddada keli ah ee aan ka leenahay gurmadka masiibooyinku waa ka hortagga silic soo gaara kuwa ay ugu adag tahay in ay u adkeystaan dhibaatooyinka ay keenaan masiibooyinku. Marka aannu bixinayno gargaar ujeeddadu ma aha wax ku doorsi ama dano siyaasadeed, mana qumana in sidaa loo qaataa.

2. Gargaarka waxa loo qaybiyaa dadka iyada oo aan lagu kala qoqobayn isir, diin iyo qoomiyad toona. Mudnaantana waxa lagu saleeyaa oo keliya baahida

Meel kasta oo ay suurtogal tahay qaybinta gargaarku waxa aan ku salaynaa daraaseyn sugan oo aannu ku samayno baahida dadka ay masiibadu saamaysay iyo kartida ururrada waddaniga ah ee ku hawlan gargaarka. Waxaana guud ahaan ka muuqda barnaamijyada oo dhan tixgelinta isu dheelitirka. Dhibaatooyinka ban'iaadamnimo waa in wax laga qabtaa meel kasta oo ay ka dhacaan, waayo nafta dadku waxa ay ku fadhidaa qiime weyn meel kasta oo ay joogaan. Sidaa awgeed ayaa ay hawlahayaga samafalku uga tarjumayaan baaxadda masiibooyinka aan ku dadaalayno in aan ka gargaarno dadka ay ku dhacaan. Waxa aan garawsanahay doorka muhiimka ah ee ay ku leeyihiin dumarku bulshooyinka u nugul masiibooyinka dhexdooda, sidaa darteed waxa aan suuro galinaynaa in doorkoodaa ay taageeraan barnaamijyadayada gargaarku oo aan la quursan. Hirgelinta nidaamkan caalamiga ah, madaxa banaan, ee cidna aan ku tiirsanayni waxa keli ah uu waxtar yeelanayaa haddii aan annaga iyo inta aannu gacansaarka leenahay helno qaraamaadka aannu u baahanahay si aan si siman ugu gaarsiinno gaargaarka ay u baahan yihiin dhammaan dadka ay masiibooyinku ku habsadeen.

3. Gargaarka looma adeegsanayo fulinta fikrado diineed ama siyaasadeed

Gaargaarka Bini'aadaminimo waxa lagu jaan goynayaa mugga baahida shaqsiyaadka, qoysaska ama qowmiyadaha ee muuqata. Xaq uma laha ururrada gargaarka ee aan dowliga ahayni in ay ku meel mariyaan caawimadooda afkaarahooda diimeed ama siyaasadeed, waxaana aan sugaynaa in aan lagu dirqiyin dadka gargaarka u baahan afkaaraha noocaas ah. Cidnaba ballan kula gali mayno in aannu deeq ay bixinayaan u qaybino dad nugul si aan u meel marino caqiido diimeed ama dano siyaasaded oo ay ka leeyihiin.

4. Waa in aan ku dadaalnaa in aynaan noqon aalad fulisa siyaasad dibadeed oo dawladi leedahay

Ururrada gargaarka ee aan dowliga ahayni waa kuwo ka madax bannaan dowladaha. Sidaa awgeed baan annagu u qaabaynaa siyaasadahayaga gaarka ah iyo istiraatijiyadayada fulineed, kana feejigannahay fulinta haba yaraatee siyaasad dibadeed oo dowladeed. Hadiibase ay dhacdo in ay kuwoodu waafaqaan siyaasadaha gargaarka waan la shaqaynayaa. Oggalaan mayno in annaga iyo shaqaalahayaga toona loo adeegsado ururinta warar leh xasaasiyad siyaasadeed, dhaqaale ama milatari oo saamaynaya dowlado ama ururro kale, arrimahaas oo dhaawacaya hufnaanta hawlaha ban'aadanimo ee aan wadno. Noqonna mayno aalad fulisa siyaasadaha dibadda ee dowladaha deeqaha bixiya. Deeqaha aan helno waxan u isticmaalaynaa oo keli ah in aan ku daboolno baahida dadka dhibban, deeqaha aan gudoomaynaana ma aha hambada la qubo ee saa'idka ka ah kuwa bixiya deeqaha, waa in aaney noqon mid u adeegta danaha siyaasadeed ee uu deeq-bixiye leeyahay. Waxa aan qiimaynaa oo dhiirigalinaa in dadku si xor ah ugu tabarucaan muruqooda iyo maalkoodaba hawlaha samafal ee aan wadno, una arkaan u jeedada keliya ee aan ka leenahay in ay tahay mid bani'aadanimo. Si aan u ilaalino madax banaanidayada waxa aan iska ilaalinaa in aan ku tiirsanaano taageerada dhaqaale ee il keliya.

5. Waxa aannu qaddarinaa Dhaqanka iyo Hidaha

Waxa aan ku dadaalnaa qaddarinta iyo tixgelinta dhaqanka iyo dhismaha hiddaha qoomiyadaha iyo waddamada aan ka dhex shaqayno.

6. Waxa aan ku dadaalnaa taabogelinta gurmad maxali ah

Dhammaan dadyowga iyo bulshooyinkuba mar kasta waxa ay leeyihiin nugayl

iyo tamar xataa marka masiibo jirto. Intii suurtogal ah waxa aannu xoojin doonnaa tamartooda annaga oo shaqaalaynayna, qalabka ka iibsanayna, waanuna la macaamili doonnaa sharikadaha waddaniga ah. Waxa aannu kala shaqaynaa urrurada kale ee gargaraarka ee aan dowliga ahayn qorshaynta iyo fulinta hawlaha samafalka, waxaannuna iskaashi la yeelanaynaa waaxyaha dawladaha hoose marka ay suurtogalka tahay. Mudnaanta kowaad waxa aannu siin doonnaa isu duwidda hawlaha gargaarka ah ee degdeg ah. Arrintani waxa ay si fiican uga hirgashaa dalalka ay ka hawlgalaan ururrada ka shaqeeya hawlaha samafalka waxaana habboon in hawsha wax laga siiyo wakiillada hay'adaha qaramada midoobay ee ay khusayso.

7. Waa in la sameeyaa siyaabo lagaga qaybgeliyo dadka ka faa'iidaya barjaamiyada maareynta hawlaha gargaarka

Qaab taakulayneed aan ku haboonayn xaaladda dadka dhibban waa in aan dusha lagaga keenin. Gargaar wax ku ool ah iyo dib u dejinta ugu fiican waxa la gaari karaa marka dadka loo wado gargaarka laga qayb geliyo qaabaynta, maaraynta iyo fulinta barnaamijyada lagu taakulaynayo. Waxa aan isku taxalujinaynaa in la helo ka qaybgal buuxa oo ay bulshadu ka qayb qaadato barnaamijyadayada samafalka iyo dib u dejinta ah.

8. Hawlaha gargaarku waa in ay yareeyaan u nuglaashaha mustaqbalka ee masiibooyinka isla markaana daboolaan baahiyaha aasaasiga ah

Dhammaan hawlaha gargaarku waxa ay u saameeyaan dhinacyada horumarineed ee mustaqbalka fog si wanaagsan ama si xun. Annaga oo maanka ku hayna taas ayaannu isku taxalujin doonnaa hirgalinta barnaamijyo samafal oo si la taaban karo uga yareeya u nugaylka masiibooyinka dadka la taakulaynayo iyo in aan ka caawinno sidii ay u abuuran lahaayeen qaab nololeed sii jiri kara. Waxa kale oo aan fiiro-gaar ah siin doonnaa duruufaha deegaanka ee saamaynaya qaabaynta iyo maareynta hawlaha samafalka. Sidoo kale waxa aannu ku dadaali doonnaa hoos u dhigga saamaynta wanaagsan ee uu ku yeelan karo gargaarku dadka la taakuleeyo, si meesha looga saaro in dadku ku tiirsanaadaan kaalmo dibadeed mustaqbalka fog.

9. Waxa aan u qoolanahay la xisaabtanka dadka aan taakulayno iyo kuwa aan ka helno qaraamaadka labadaba.

Badanaaba waxa aan u shaqaynaa sidii bar xiriirineed oo isku xirta dadka jecel in ay deeqaha bixiyaan iyo kuwa u baahan deeqdaa wakhtiyada ay masiibooyinku dhacaan. Waana sababtaas tan aannu isugu waajibinay in aannu ahaano cidda ay labada dhinacba la xisaabtamayaan. Dhammaan la macaamilka aan la yeelano

deeq bixiyayaasha iyo dadka la taakulaynayaba waxa ay yihiin kuwo furfuran oo aan wax mad madow ah lahayn. Waxa aan garawsanahay baahida loo qabo in aan ka warbixino hawlahayaga dhicayada maaliyadda iyo waxqabadkaba. Waxa aan ognahay waajibka naga saaran hubinta habsami u socodka qaybinta gargaarka iyo samaynta qiimayn joogto ah oo lagu ogaanayo saameynta uu ku yeeshay wax ka qabashada masiibada. Waxa kale oo aannu danaynaa in si aan qarsoodi ahayn aan uga war bixino heerka wax qabadkayaga iyo arrimaha horumarinaya ama hortaagan hawlahayaga samafal. Barnaamijyada waxa saldhig u ah mug xirfadeed iyo mid khibradeed oo sare si aan uga dhawrsano khasaare ku yimaada maaliyadda iyo agabka qiimaha leh ee aan ugu adeegno dadka.

10. Hawlahayaga war-baahineed, Baahinta Magacayaga iyo xayaysiinta, waxa aannu gudo galnaa annaga oo garawsan karaamada iyo sharafta bani'aadminimo ee dadka wax yeeloobay leeyihiin, umana aragno sidii wax aan rajo laga qabin

U tixgelinta dadka tabaalaysani in ay yihiin kuwo nagala hawlgali kara hawlaha gurmadku, waa qodob mudan in maanka lagu hayo. Warbixinahayaga waxa aan ku tilmaanaa muuqaalka masiibada iyo dadka ay ku habsatay, waxaana reeban in aan ku cabbirno oo keliya nugaylka iyo cabsidooda. Iyada oo aannu kaashan doonno warbaahinta si aannu u helno gargaar ayaanu haddana ka feejignaan doonnaa dalaabaadka gudaha ama dibadda ee isku dayaya in ay uga faa'idaystaan hawlaha gargaarka danahooda gaarka ah. Waxa aannu ka feejignaan doonnaa kula tartamidda ururrada kale ee gargaarka galaangalka warbaahinta, waayo waxa ay arrintani wiiqi kartaa qaybinta gargaarka, waxaana ay ku keeni kartaa halis xagga ammaanka ah dadka ka faa'iidaysta gargaarka (ee tabaalaysan) iyo shaqaalaha gargaarka labada.

Jawiga lagu shaqaynayo

Iyada oo heshiis dhinac keliya ah aan ka gallay in lagu dadaalo u hoggaansamidda xeerkan kor ku xusan, ayaannu hoos waxa aan ku soo bandhigaynaa qaar ka mid ah xeerarka degsan ee tusmaynaya jawiga lagu shaqaynayo ee aannu jecelnahay in ay abuuraan dowladaha deeq-bixiyeyaasha ah, dowladaha martida loo yahay, iyo weliba wakaaladda dowladaha ka dhexeeya-mabdi'iyan Hay'adaha Qaramada Midoobay si loo fududeeyo ka qaybgal wax ku ool ah oo ay sameeyaan Urrurada bani'aadanimada ee aan dowliga ahayn marka masiibooyinka laga hawlgalayo.

Xeerarka deggani waa qaar loo soo bandhigay in ay noqdaan keliya hagayaal. Ma aha qaar, qaanuun ahaan, wax qabanaya, kamana rajaynayno in dowladaha iyo ururrada ka dhexeeya dowladuhu toona ku muujiyaan aqbalkooda saxiix, in kasta

oo ay tani noqon karto yoolka aan higsanayno mustaqbalka. Haatan waa qaar soo bandhigiddooda laga leeyahay uun in kor loogu qaado kalfurni iyo iskaashi, si kuwa aannu wada shaqaynta la leenahay ay u noqdaan qaar ka warqaba nooca xiriir ee ugu fiican ee aan la yeelanayno iyaga.

Lifaaqa 1aad: Talooyin ku socda dowladaha dalalkoodu masiibadu haleeshay

1. Dowladuhu waa in ay aqoonsadaan oo ay ixtiraamaan madaxbannaanida, bani' adamnimada iyo hawlaha dhexdhexaadnimo ee ay wadaan Ururada Bani'aadamnimada ee aan dowliga ahayn

Ururrada bani'aadamnimada ee aan dowliga ahayn waa ururro madax bannaan; madaxbannaanidooda iyo dhex-dhexaadnimadoodu waa in ay noqdaan qaar ay ixtiraamaan dowladaha ay martida u yihiin.

2. Dowladaha martida loo yahay waa in ay fududeeyaan in ay Ururada Bani'aadamnimada ee aan dowliga ahayn si fudud ula kulmi karaan dadyowga ku tabaaloobay masiibooyinka

Haddii la rabo in ay ururrada samafalku fuliyaan gargaaradooda ku salaysan mabaadi'da bani'aadminimo waa in loo oggalaado in ay ula kulmaan dadyowga tabaaloobay si aan kala sooc lahayn oo dhakhso ah, si loo garsiin karo gargaar bani'aadmnimo. Waa qayb ka mid ah xilgudashada dowladeed in ay oggolaato oo aanay marnaba xayirin, iyo in ay weliba aqbasho in ay yihiin talaaboyinka Ururada Bani'aadamnimada ee aan dowliga ahayn qaar siyaasad ka fog. Dowladuhu waa in ay fududeeyaan in shaqaalaha samafalku u soo geli karaan waddamadooda si fudud, iyaga oo ka saamaxaya fiisayaasha dal ku-galka, kuwa ku sii dhexmarka, iyo weliba kuwa ka bixidda; ama ay oggolaadaan, ugu yaraan, in ay u fududeeyaan heliddooda. Sidoo kale, dowladuhu waa in ay bixiyaan ruqsad ay diyaaradaha sida gargaarku ku isticmaalayaan hawadooda iyo mid deggidba, wakhtiga gargaarka degdegga ah la wado.

3. Dowladuhu waa in ay fududeeyan isu socodka caawimooyinka iyo waliba macluumaadka xilliyada lagu jiro dhibaatooyinka.

Ujeeddada keliya ee laga leeyay gargaarka bani'aadminimo (agab iyo qalabba) waa in ay meesha ka saaraan dhibka haysta dadyowga tabaalaysan, ka faa'iidaysi ganacsi ma aha ujeeddadu. Sidaa awgeed waa in ay noqdaan macaawanooyinku qaar aan isu socodkooda wax caqabad ah loo dhigin. Caqabadahaasi ha noqdeen

iyada oo la weydiinayo in ay qunsuliyaduhu soo caddeeyaan halka ay ka yimaadeen alaaboyinkaasi, oggolaansho soo dejineed ama dhoofineed, lacagaha lagu bixiyo garoomada dayuuradaha ama dekedaha, iwm.

Soo dejinta muddadeedu kooban tahay ee agabka lama huraanka u ah samafalka sida baabuurta, diyuuradaha yaryar, iyo qalabka isgaarsiinta waa in ay sahlaan soo dejintooda dowladaha ay ku socdaan iyaga oo ka cafiyaya haysashada oggolaansho soo dejineed; iyaga oo meesha ka saaraya in lagu qasbo in ay is diiwaangeliyaan, iwm. Sidaa si la mid ah, waa in aanay dowladuhu horjoogsan in dib loo sii dhoofiyo agabka samafalka marka ay dhammaadaan hawlgallada samafaleed.

Si ay u fududaato isgaarsiinta masiibooyinku, waxaa lagu dhiiri gelinayaa dowladda martida loo yahay in ay siiso hay'adaha ku hawlan gargaarka mawjado isgaarsiineed (frequencies) oo u gaar ah oo ay u isticmaali karaan hay'adahaasi xiriir gudeed iyo mid dibadeed labadaba. Mawjadahaasi waa in ay noqdaan qaar ay ogsoon yihiin dhammaan bahweynta ku hawlan la tacaalida masiibiyinku.
Dhibaatooyinku inta aaney dhicin ka hor, waa in loo oggolaadaa shaqaalaha samafalku in ay isticmaalaan hababka isgaarsiimeed ee loogu baahan yahay hawlgallada samafalku.

4. Dowladuhu waa in ay dejiyaan qorshayaal ku saabsan sidii loola tacaali lahaa masiibada, sidoo kale waa in ay isku dubbaridaan wixii warar ee ku saabsan masiibada

Guud ahaan qorshaynta iyo iskudubbaridka dadaallada samafalku waa qaar si gaar ah xil uga saaran yahay dowladda martida loo yahay. Isku dubbaridka hawlaha iyo qorshayntuba waa qaar si aad ah hore loogu marin karo haddii hay'adaha ku hawlan samafalka la siiyo war ku saabsan baahiyaha jira, sida ay dawladdu u qorshaysay in loo fuliyo gargaarka, iyo weliba wararka ku saabsan dhibaha xagga ammaanka ee ay la kulmi karaan hay'adaha samafalku. Dowaladaha waxaa lagu dhiiri gelinayaa in ay siiyaan wararka caynkaas oo kale ah ururrada ku hawlan gargaarka.

Si loo fududeeyo iskudubbarid wax ku ool ah, si buuxdana looga miro dhaliyo dadaallada samafalka, dowladda martida loo yahay waxaa lagu dhiiri-gelinayaa in ay u magacawdo, masiibada inta aanay dhicin ka hor, qof xiriiriya hay'adaha samafalka iyo mamulka jira (dawladda).

5. Wax ka qabashada masiibooyinka xilliyada ay jiraan iska hor imaadyo hubaysani

Marka uu dhaco iska horimaad hubaysani, howlaha samafalku waxa ay noqononayaan qaar u hogaansama qawaaniinta caalamiga ah ee bani'aadminimo.

Lifaaqa 2aad: Talo bixin ku socota dowladaha deeqda bixiya

1. Dowlada deeqda bixiyaa waa in ay aqoonsadaan, ixtirimaanna madaxbannaanida, dhexdhexaadnimada iyo hawlaha banii'aadamnimada ku salaysan ee Ururrada bani'aadanimada ee aan dowliga ahayn

Ururrada bani'aadamnimada ee aan dowliga ahayn waa hay'ado madax-bannaan oo ay tahay madaxbaninooda iyo dhexdhexaadnimadoodaba in ay ixtiraamaan dowladda deeqda bixinaysaa. Sidoo kale, dowladaha deeqda bixinayaa waa in aanay u isticmalin Ururrada bani'aadamnimada ee aan dowliga ahayn in ay ku fushadaan dano siyaasadeed amaba ay ku faafiyaan afkaartooda.

2. Dowladaha deeqda bixiyaa waa in ay bixiyaan wixii deeqa ah iyaga oo isla markaana damaanad qaadaya madaxbannaanida hawlgalada bani'adminimada

Hay'adaha samafalku waxa ay u aqbalaan wixii deeqo ah si la mid ah sida ay u u fuliyaan gargaaradooda ay garsiiyaan kuwa tabaalaysan oo ah mid ku salaysan bani' aadminimo iyo madax-bannaani. Go'aanka kama dambaysta ah ee fulinta hawlaha samafalku waa mid xilkiisa saaran yahay hay'adda samafalka ee ku hawlan, waxaana ay noqon doonaan hawlahaasi qaar loo fuliyo sida ay dhigayaan siyaasadda u dejisan hay'adahaas.

3. Dowladaha deeqda bixiyaa waa in ay u adeegsadaan xafiisyadooda sidii ay ugu fududayn lahaayeen hay'adaha samafalka sidii ay u gaari lahaayeen dadyowga ay ku habsadeen masiibooyinku

Deeqbixiyayaashu waa in ay aqoonsadaan muhiimadda ay leedahay in ay aqbalaan, ilaa xad, mas'uuliyadda ka saaran nabadgelyada iyo in ay si xor ah u tagaan hawlwadeenada samafalku meelaha ay dhibaatoyinku ka dhaceen. Waa in ay deeq bixiyeyaashu diyaar u noqdaan, haddii ay lagama maarmaan noqoto, in ay isticmaalaan diblomaasiyad sidii ay uga dhaadhicin lahaayeen dowladaha gargaarka loo fidinayo in ay u fududeeyaan hay'adaha samafalka waxyabaha ay u baahan yihiin.

Lifaaqa 3aad: Talo bixin ku socota ururrada dowladaha ka dhexeeya

1. Urarrada dowladaha ka dhexeeyaa waa in ay u aqoonsadaan Ururrada bani'aadamnimada aan dowliga ahayn ee waddaniga ah iyo kuwa ajaanibka ah labadaba, in ay u yihiin bahwadaag (Partners) muhiim

Ururrada bani'aadamnimada ee aan dowliga ahayn waa qaar u heellan in ay la shaqeeyaan Qaramada Midoobay iyo wakalaadaha kale ee caalamiga ah si ay u suurtogasho wax ka qabad tayo leh oo masaa'ibka ku waajahani. Waxa ay sameeyaan sidaa iyaga oo maanka ku haya iskaashi ixtiraamaya daacadnimada iyo madaxbanaanida dhammaan kuwa ay bahwadaagta la yahay.

Sidoo kale ururrada dowladaha ka dhexeeyaa waa in ay ixtiraamaan madaxbannaanida iyo dhex-dhexaadnimada Urrurada bani'aadamnimada ee aan dowliga ahayn; isla markaana, waa in ururradaasi laga talo geliyaa diyaarinta qorshayaasha samafalka.

2. Ururrada ka dhexeeya dawladuhu waa in ay ka caawiyaan dawladaha ay masiibooyinku ku dhacaan hawlaha isku dubaridka masiibooyinka iyo sidii loo abuuri lahaa qaabshaqeed ka dhexeeya hawlaha samafalka ee Caalamiga ah iyo kuwa waddaniga ah

Inta badan Ururrada bani'aadamnimada ee aan dowliga ahayn awood uma laha in ay sameeyaan qaabshaqeedka nidaam isku dubbarideed oo ka dhaxeeya hay'adaha oo dhan marka ay timaaddo masiibo u baahan in looga howlgalo si caalimi ah. Tan masuuliyaddeedu waa mid saaran dowladda iyo maamullada hay'adaha Qaramada Midoobay ee ay khusayso. Kuwan waxa lagu dhiirigelinayaa in ay bixiyaan adeeggan marka loo baahdo si wax ku ool ah si loogu adeego dalalka dhibku haleelay, iyo waliba si loogu fududeeyo hawlahooda kuwa ku howlan wax ka qabadka masiibada dhacday.
Mar kastaba waa in ay ururrada bani'aadamnimada ee aan dowliga ahayn sameeyaan dhammaan wixii dadaal ah ee suurtogelinaya in si wax ku ool ah la isugu dubbarido adeegyadooda.

Marka iska hor-imaad hubaysani dhaco, howlaha samafalku waxaa lagu hoggaamiyaa shuruucda caalamiga ah ee u dejisan qawaaninta bani'a adamka.

3. Ururrada dowladaha ka dhexeeyaa waa in ay sugaan ammaanka ururrada bani'aadamnimada ee aan dowliga ahayn sida ay u sugaan amniga ururrada Qaramada Midoobay.

Mar kasta oo la dammaanad qaado amniga urarrada dowladaha ka dhexeeya, sidaa si la mid ah waa in loo sugaa amniga ururrada kale ee ku howlan hawlaha samafalka, goorta ay sidaas codsadaan.

4. Ururrada dowladaha ka dhexeeya waa in ay ugu oggalaadaan ururrada bani'aadamnimada ee aan dowliga ahayn in ay helaan wararka khuseeya, si la mid ah sida ay ugu oggolaadaan ururrada Qaramada Midoobay

Ururrada dowladaha ka dhexeeya waxaa lagu dhiiri-gelinayaa in ay la wadagaan dhammaan wixii war ah ee fududaynaya in si wax ku ool ah loola tacaalo masiibooyinka kuwa jaalka kula ah ka hawlgalka dhibka ururrada bani'aadamnimada ee aan dowliga ahayn.

3. Acknowledgements

Sphere Project Staff Team

Project Manager: Nan Buzard

Training Manager: Sean Lowrie

Project Officer: Veronica Foubert

Project Senior Assistant: Elly Proudlock

Sphere Project Management Committee

InterAction ◊ Save the Children Alliance ◊ CARE International ◊ The Lutheran World Federation (ACT) ◊ Voluntary Organisations in Cooperation in Emergencies (VOICE) ◊ Mercy Corps ◊ Action by Churches Together (ACT) ◊ Oxfam GB ◊ Steering Committee for Humanitarian Response ◊ International Committee of the Red Cross ◊ International Federation of the Red Cross and Red Crescent ◊ International Council of Voluntary Agencies (ICVA) ◊ Caritas Internationalis

Donors

In addition to contributions by the member organisations listed above, funding for the Sphere Project was provided by:

The Australian Agency for International Development (AusAID) ◊ The Belgian Ministry of Development ◊ The Canadian International Development Agency (CIDA) ◊ Caritas Spain ◊ Danish International Development Assistance (DANIDA) ◊ The Disaster Emergency Committee (DEC) ◊ The Finnish Government Development Agency (FINIDA) ◊ The European Community Humanitarian Office (ECHO) ◊ The Ford Foundation ◊ Development Cooperation Ireland (DCI) ◊ The Netherlands Ministry of Foreign Affairs Humanitarian Aid Division ◊ The New Zealand Ministry of Foreign Affairs and Trade ◊ The Foreign Ministry of Norway ◊ The Swedish International Development Cooperation Agency (Sida) ◊ The Swiss Agency for Development and Cooperation (SDC) ◊ The United Nations Children's Fund (UNICEF) ◊ The United Kingdom Department for International Development (DFID)